

UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/09/2023, Anigoo ah Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- MAXAMED AXMED XASAN, Hooyo: Qamar Macalin Nuur Cilmi, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1985, Degan Muqdisho, Sita: Warqadda Sugnaanta 0137472 Kana Soo Baxay D/Hoose Ee Muqdisho

LA WAKIISHE:- Maryan Macalin Nuur Cilmi, Hooyo: Muslimo Yuusuf Cabdi, Somali ah, Ku Dhalatay: Cadaado, Jirta 80 Sano,

B- Aniga oo ah **MAXAMED AXMED XASAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka Fayow Cid I Khasbaysana Aysan jirin in aan Wakiishay Habartay **MARYAN MACALIN NUUR CILMI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Qayb Dhaxaleedka aan Ku Lee Yahay Hooyaday **Marxuumad Qamar Macalin Nuur Cilmi** Oo Sii Dhaxlaysa **Marxuum Macalin Nuur Cilmi Cawaale**, Dhaxalkaas Oo ah Beero iyo Guryo Ku Yaala Degmada Cadaado, in Qaybteeyda ay ii gadi karto, Wareejin Karto, Dhaxalkoob u Sameen karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in Habartay **MARYAN MACALIN NUUR CILMI** awoodaas aan siiyay ay u madax banana Tahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MARYAN MACALIN NUUR CILMI**, Waxaan Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **MAXAMED AXMED XASAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

MAXAMED AXMED XASAN

Maxamed

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MARYAN MACALIN NUUR CILMI

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- **ABSHIR CALI SHUUTE**

2- **XASAN AWEYS AXMED**

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 816/T.P.N/23, Tr. 09/09/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **MAXAMED AXMED XASAN** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **Maryan Macalin Nuur Cilmi** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Shaxane

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"



MASAWIRKA WAKAALAD BIXIYAHA

MAXAMED AXMED XASAN



MARKHAATIYAASHA

1-ABSHIR CALI SHUUTE



2-XASAN AWEYS AXMED



Computer Serial #

0137472



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU

WARQADDA SUGNAANTA

Certificate of Identity confirmation



DUQA MAGAALDA MUQDISHO WUXUU CADDEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUULKA IYO MARIYADA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QUFKA HOOS KU XUSAN:

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears hereon has the following details:)

MAGACA Full Name	MOHAMED AHMED HASSAN
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	01-Jan-1985
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID Number	0137472
JINSI Gender	Male
XAALADA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Wartanabadda
MAGACA HOYADA Mother's Full Names	QAMAR MOALIM NUR
TARIKHDA LA BIXIYEY Date of Issue	26-Sep-2020
SHAQADA Occupation	DRIVER



Right Thumb Print




Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

Cumar Maxamuud Maxamed





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 11/09/2023

Aniga oo ah Maxamed Cabdi Cali waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay Maxamed Axmed Xasan oo ka Wakiil ah La Wakiishe Maryan Macalin Nuur Cilmi Dukumiintiga Original Wakaalada Gaarka ah Rep No. 816/W.P.N/23, Tr. 09/09/2023, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Maryan Macalin Nuur Cilmi
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X7.50
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada H/Wadaag
Lotto Lambar	910
W.M.L	Sabarloog a/a/2023, Tr. 10/09/2023 Rasiid Lam. a, Tr. 04/09/2023
Taariikhda Wakaalada	09/09/2023

Wakiilka La Wakiishe: Aniga oo ah Maxamed Axmed Xasan, Leh Tel No. 0617065689, Degan Muqdisho Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska Nootaayaha Waddani Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay Maryan Macalin Nuur Cilmi.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamed Axmed Xasan